Daryeelka Caafimaadka ee Ontaariyo: Helitaanka Daryeelka Caafimaad ee Deg-degga ah

Haddii aad qabtid dhibaato caafimaad oo naftaada halis ku ah, isla-markaaba tag qolka dawaynta degdegga ee cusbitaalka ama waxaad isla-markaaba wacdaa taleefoonka 9-1-1. Shaqaalaha 911 qabanaya wuxuu kuu heli karaa turjumaan (haddii aad turjumaan u baahatid).

1. Cusbitaalku keliya waa mid ka mid ah goobaha aad daryeelka caafimaadka ee deg-degga ah (gurmadka) aad ka heli karaysid. Mararka qaarkood waxay dadku cusbitaalada u tagaan, maadaama ayna garanayn meel kale oo ay tagaan. Waxaad meeshan ka heli kartaa warbixin kaa caawisa ogaanshaha goobaha aad ka heli karaysid dareeylka caafimaadka deg-degga ah:

- Meelaha aad ka heli karaysid gargaarka caafimaadka ee deg-degga ah ee xaaladaha aan nafta halista ku ahayn
- Meelaha aad ka heli karaysid gargaarka caafimaad ee deg-degga ah ee dhibaatooyinka nafta halista ku ah

Waxad xaashidan xaqiiqada oo luuqado badan ku-diyaarsan aad ka heli kartaa shabakadda internet-ka ee uu ciwaankeedu yahay *ontario.ca/healthcarebasics*. Waxaad dhag ka-siisaa (Click) furaha "Information in Other Languages". Waxaa kale oo aad naqshadda internet-ka ka-baran doontaa sida aad xannaano caafimaad ugaga heli kartid gudaha Ontaariyo.

Meelaha aad ka heli karaysid gaargaarka caafimaadka ee dhibaatooyinka gurmadka deg-degga ah u baahan, balse aan nafta halis ku ahayn

2. Yaa igargaari kara haddii aan xanuunsanayo ama haddii uu dhawac isoo gaadho iyo haddii aan garanayn waxaan sameeyo?

Waxaad Telehealth Ontario ka wacdaa taleefoonka ah 1-866-797-0000. Khadkan waa mid bilaa lacag ah oo asturan (confidential), waana adeeg aad mar-welba (dharaar iyo habeenba) soo wici karaysid. Kal-kaaliye caafimaad ayaad talo iyo xog caafimaad oo guud ka heli doontaa. Kal-kaaliyhu wuxuu kaa-caawin doonaa in go'aan ka-gaadhid arrimaha hoos ku-qoran:

- in aad gurigaaga dhexdiisa aad iskaa isku-daryeeshid
- in aad dhakhtarkaaga ballan la-yeelatid
- in aad rug caafimaad tagtid
- in aad tagtid qolka gurmadka degdegga ee cusbitaalka.

3. Haddii aan la kulmo dhibaato caafimaad oo aan nafta halis ku ahayn, balse gargaar deg-deg ah u baahan, xaggeebaan gargaarkaas u doonan karaa?

Waxaad wacdaa dhakhtarkaaga qoyska, Kooxda Caafimaadka Qoyska ama Rugta Caafimaadka ee Kal-kaaliyaha Caafimaad ee Guud si aad u ogaatid bal in aad bilaa ballan ama saacadaha xilliga shaqada ka-baxsan aad adeeg baadhitaan ka heli karaysid iyo in kale. Haddii aanad lahayn dhakhtar-qoys, waxaad u baahan kartaa in aad tagtid rugaha caafimaadka ee bilaa ballanta la tago ama kuwa shaqeeya saacadaha ka-baxsan xilliga shaqada. Shaxdani waxay soo-koobaysaa meelaha aad adeeggaas ka heli karaysid.

Somali – Health Care in Ontario: Getting Emergency Care Cat# 015639 Nov/2010 © Queen's Printer for Ontario

Ontario

Haddii aad qabtid dhibaato caafimaad oo gurmad deg-deg ah u baahan oo ah sida:	Waxaad gargaar u doontaa:	Sida ay kuu gargaari karaan:
Ifilo, qufac iyo hargab, dhaawac fudud, iyo dhibaatooyin caafimaad oo muddo dheer jiray	Dhakhtar-qoys ama rug caafimaad oo bilaa ballan la-tagi karo	Waxay bilaa ballan ku-baadhi karaan saacadaha shaqada ee caadiga ah ama saacadaha wakhtiga shaqada ka-baxsan
Dhaawacyada indhaha, boogaha, jabitaanka lugaha ama gacmaha, raajitada iyo baadhitaanada shay-baadhka.	Xarunta Caafimaadka Gurmadka Deg-degga	Waxaad adeeg ka heli kartaa 24 saacadood ee maalinta iyo weliba maalmaha fasaxa ee toddobaadka, adiga oo aan ballan la-yeelan

4. Sideen u heli karaa dhakhtar ama adeeg-bixiye kale oo caafimaad?

Waxaa iska-diiwaan-gelisaa **Xidhiidhka Daryeelka Caafimaadka** (**Health Care Connect).** Waxaa isku-diiwaan-gelin kartaa adeeggan bilaa lacagta ah ee shabkadda internet-ka ama waxaad wacdaa taleefoonka 1-800-445-1822. Waxaad hubisaa in aad kaar shaqaynaya u haysatid Adeegga **Ontario Health Insurance Plan** (OHIP).

5. Haddii ay ugu-dhacdo dhibaato caafimaad oo gurmad deg-deg ah u baahan oo uusan dawayn karayn dhakhtarkayga qoysku xaggeen tagi karaa?

Waxaad tagtaa rugta caafimaadka ee bilaa ballanta lagu tagi karo (walk-in clinic) ama Xarunta Daryeelka Caafimaadka Deg-degga ah .ee kugu dhaw. Ama, haddii aad mid ka diiwaan-gashan-tahay waxaad wacdaa Kooxda Caafimaadka Qoyska. Waxaad gargaar caafimaad heli kartaa maalinimada, fiidka iyo maalmaha nasashada ee toddobaadka. Xarumahani waxay kaa caawin karaan dhibaatooyinka sida dhaawacyada indhaha soo gaadha, boogaha, jabitaanka gacmaha iyo lugaha, raajitada iyo baadhitaanada shay-baadhka. Adiga oo aan ballan la-yeelan ayaad iska-tagi kartaa. Waa in aanad soo iloobin kaarkaaga OHIP.

Meedha aad gargaar u doonan kartid haddii ay ku soo gaadhaan dhibaatooyin caafimaad oo naftaada halis ku ah

6. Goormaan tagayaa qolka gurmadka deg-degga ee cusbitaalka?

Qolka gurmadka deg-degga waxaa kale oo la-yidhaahdaa ER. ER wuxuu bukaanaada cusbitaalka jooga uu siiyaa daryeel caafimaad iyo qalliin deg-deg ah. Qolka gurmadka deg-degga ah (ER) keliya waxaad u tagaysaa xanuunka ama dhaawaca naftaada halista ku ah.

7. Miyaan u yeedhan karaa anbalaas iiqaadda qorlka gurmadka deg-degga (ER)?

Ontaariyo waxay dhibaatooyinka caafimaad ee kediska ah ee gurmadka deg-degga u baahan ay intooda badan siisaa adeeg anbalaas oo cirka iyo dhulkaba ah. Anbalaasyadu (ambulances) waxay si deg-deg ah kuu gayn karaan ER-ta, waxayna kuu diyaarinayaan dad taba-baran oo ku gargaaraya inta aad goobta caafimaadka u sii socotaan. Marka ay anbalaastu tahay mid dhulka socota waxay bixinaysaa hoon (dhawaaq digniin ah) oo ay baaburta kale waddada ugu firaaqaynayaan.

Haddii aad u baahatid anbalaas cusbitaalka ku gaysa, waxaa kharashka anbalaasta intiisa badan bixin doona Ontario Health Insurance Plan (OHIP). Adigu waxaad bixin doontaa qayb yar oo lacagtaasi ka tirsan ($45).

Xusuus: Haddii uu dhakhtarku sheego in aad anbalaasta isticmaashay adiga oo aan u baahnayn, waxaa qasab noqonaysa in aad bixisid $240.

8. Sideen anbalaasta ugu yeedhan kara?

Si aad anbalaasta ugu yeedhatid, taleefoon-kasta ka wac taleefoonka 911. Shaqaalaha kaa qaban doona taleefoonka 911 haddii aad turjumaan u baahan tahay wuu kuu diyaarin karaa. Waxay ku weydiinayaan dhibaatadaada caafimaadka, haddii aan anbalaas u baahatana way kuu soo dirayaan. Waxaad naga soo wici kartaa taleefoon-kasta.

9. Miyaan u baahnahay in aan kaarkayga OHIP u qaato qolka gurmadka deg-degga ah (ER)?

Dhakhaatiirta jooga qolka gurmadka deg-degga ee cusbitaalku iyaga oo aan kaarkaaga eegin ay marka hore ku-dawaynayaan. Laakiin haddii aad doonaysid in Ontario Health Insurance Plan OHIP) uu lacagta adeegga caafimaadka bixiyo, waxaa marka danbe lagu waydiinayaa kaarkaaga OHIP.

10. Maxaa dhacaya kaddib markaan tago qolka gurmadka deg-degga ah (ER)?

Kaddib markaad qolka soo gaadhid, waxay u badan-tahay in ay dhici doonaan arrimaha hoos ku-qoran:

- Marka ugu horaysa, waxaa lagaaga baahan-yahay in aad ku-saxeexdid miiska xagga soo-dhawaynta ee qolka gurmadka deg-degga (ER). Waxay taasi shaqaalaha uu suuragelinaysaa in ay ogaadaan imaatinkaaga iyo waxay dhibaatadaadu tahay. Haddii ay dhibaatadaada caafimaadku noqoto mid wax-ka-qabasho deg-deg ah u baahan, waxaa isla-markaaba ku-baadhaya kal-kaaliye caafimaad ama dhakhtar.

- Kaddibna, waxaad la kulmi doontaa kal-kaaliye caafimaad. Kal-kaaliyahan caafimaadku wuxuu hubiya ugu xanuun-badani ay helaan fursadda ugu horaysa ee la kulmidda dhakhtarka.

- Haddii ay noqoto in aad sugtid, waxay dhici doonta in laguu sheego in aad goobta sugitaanka sii joogtid.

- Shaqaalaha ayaa ku yeedhi doona marka uu qolka baaditaanku diyaar noqodo. Waxay u badan doontaa in ay qolka baadhitaanka yaallaan sariir iyo kursi. Waxaa kale oo qolka laga heli karaa qaar ka mid qalaabka baadhitaanka caafimaadka. Waxaa dhici karta in aad qolka ku sii sugtid illaa uu dhakhtarku kuu imanayo.

- Marka uu dhakhtarku yimaaddo, wuxuu ku waydiin doona dhibaatadaa caafimaadka, wuxuuna kugu samaynayaa baadhitaan. Marka ay xaaladdu heerkan marayso, waxaa dhici karta in aad u baahatid raajito ama baadhitaan shay-baadh. Waxaad sugaysaa natiijooyinka baadhitaanka.

Kaddib marka uu dhakhtarku aqoon dheeraad ah u yeesho dhibaatadaada caafimaadka, wuu ku dawaynayaa, waxaanad ku sheegi doonaa in aad gurigaa ku noqotid. Ama, haddii ay dhibaatada caafimaad noqoto mid adag, si aad baadhitaan iyo dawayn dheeraad ah u heshid waxaad sii joogi doontaa cusbitaalkay.

11. Haddii aad qolka gurmadka deg-degga (ER) tagid, muddo intee dhan ayaa sugaysaa?

Waxaa jiri kara arrimo badan oo saamayn ku yeelan kara muddada ay joogi doontid ER:

- Heerka ay gaadhsiisan tahay dhibaatadaada caafimaadku
- Saacadda iyo maalinta aad ER-ta tagtay
- Weynida iyo goobta uu ku-yaallo cusbitaalka aad tagtay
- Culayska hawsha ee ER-ta ka jirta ama jiritaanka bukaano uu ay shilal culus ku-dhaceen ama joogitaanka sidba bukaanada saf-mareenka ifilada (flu)
- Haddii aad u baahtid in cusbitaalka u sii joogtid qalliin ama adeegyo kale oo dawayn ah

Waxaad warbixin dheeraad ah oo ku-saabsan muddada joogitaanka cusbitaalka ka heli kartaa shabkadda internet-ka.

12. Waxaan qaba su'aalo ku-saabsan isticmaalka habka daryeelka caafimaadka ee ka jira Ontaariyo. Yaan wici karaa?

La-xidhiidh ServiceOntario, INFOline inta u dhaxaysa 8:30 aroornimo illaa 5:00 galabnimo. Shaqaaluhu waxay kari doonaan in ay kugu caawiyaan luuqadda Ingiriisiga, Faransiiska iyo 20 luuqadood oo kale. Soo wac:

- 1-866-532-3161
- TTY 1-800-387-5559
- GudahaToronto, TTY 416-327-4282

Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa health.gov.on.ca